**Macallinka Skyline Wuxuu Ku Dhiirigeliyaa Ardayda Inay Socodka Gaabiyaan Ka Dibna Kor Fiiriyaan**

Haddii aad waligaa nasiib u leedahay inaad ku lifaaqdo magaca Tom Myers iyo naadigiisa shimbiraha ee Dugsiga Skayline, waxay u badan tahay inaad ogaan doonto dhowr arrimood: In Skyline subaxda hore ay tahay meel aad u qurux badan, iyo haddii aad hayso su'aal ku saabsan shimbiraha – ama guud ahaan dabeecadda dunida- ninkan ardaydiisu waxay ugu yeedhaan"Macallin Tom" waxaana hubaal ah inuu inta badan inuu ka jawaab celin.

Myers oo wax u dhiga ardayda fasalada saddexaad iyo afraad ayaa had iyo jeer wuxuu ahaa mid jecel dabeecaddam laakin waxay ahayd markii sanadku ahaa 2017 inuu runtii dareenkiisa ugu jeediyo cirka. Waxa uu akhrinayey buugga uu qoray Kyo Maclear, ee magaciisu yahay Birds Art Life: *Sanadkii U Fiirsashada*,sidoo kale isaga iyo saaxiibadiis waxay dhex qaadayeen inta u dhaxaysa Smithiyo Bybee Wetland oo ku taala Waqooyiga Portland ahna goob ka mid ah dhulka la ilaaliyey. Waxay awood u yeesheen inay aqoonsadaan qaar ka mid ah shimbiraha ay arkeen,Myers wuxuu aad ula yaabay waayo-aragnimada iyo ereyada Maclear labadaba muhiimada ay leedahay ee ku saabsan in tartiib loo socdo iyada oo loo fiirsanayo, go'aansadeena inay ka dhisaan gurigiisa gadaashiisa meel shimbiraha ay galaan oo soo jiita inay soo degaan.

Shimbiro aad u kala gedisan ayaan ku soo qulqulay si ay cunto uga cunaan, shimbirahaasi waxaa ka mid ah kuwo uu si gaar ah Myers u tixraaco oo ahaa "spark bird," ama shimbirta isaga u soo dabeysay shimbiraha kale dhinaca kalena isaga xoojisay aqoonsigiisa inuu yahay qof shimbiraale.

"Waxaan mar horeba bilaabay inaan daawado goobtii ay shimbiraheygu isugu yimaadeen, iyada oo aan keensaday diirada lagu daawado shimbiraha, aniga oo u isticmaalaya inay ii noqdaan hagaheyga marka aan joogo goobaha shimbiraha lagu daawado iyada oo aan wax ka baranayo ku saabsan shimbiraha aan arkay," ayuu yidhi. "Ka dib waxaan ogaaday shimbirta la yiraa Spotted Towhee inay tahay hagaheyga iyada oo aan ka akhriyey online siday u caadi ay u ahaayeen. Waxay ahayd shimbir aan go'aansaday aan rabay inaan arko, iyo in isla maalintaasi,ay midi soo booqatay goobta gurigeyga gadaashiisa ah ee aan u sameeyey shimbiraha ka dib aan ayaan ugu farxay. Waxaana soo baxday in shimbirkaasi maalin walba soo booqdo iyada oo ay u badan tahay inuu ku noolaa ama uu muddo ku noolaa meel u dhow gurigeyga gadaashiisa, laakiin taasi waa mid ka mid ah farxada ugu weyn in lala socdo shimbiraha: Waxay ku soo kordhisay lakab weyn oo cusub sida aan arko dunida igu wareegan."

Qaab cusub oo loo fiirsho dabeecadda dunida waxay runtii tahay waxa uu Macallin Tom ka rajeynayo inuu ku beero ardaydiisa, kuwaasi oo sida ay u dhan yihiin si xamaasad leh u isticmaal "foogaan aragooda" subax kasta oo Arbaca ah marka ay u baxaan inay kula soo lugeeyaan dhismaha , indhahooda iyo dhagahoodu waxay u furan yihiin daahfurka waxyaabo hore ayna u aqoon.

“Waxaan rajeynayaa inay waqti u qaataan meel ka baxsan Naadiga Shimbiraha(Bird Club) inay gaabiyaan, wax ka ogaadaan dunida iyo xayawaanka inagu hareereysan,” ayuu yidhi Myers. “ Haddii ay joogaa dugsiga, guriga, jardiinooyinka, iwm., mar haddii uu qofku ku faraxsan yahay dabeecadda, waa inay soo arkaan dunida ku fiirshaan fogaan aragga meel kasta ha ka joogeene.”

Myers wuxuu bilaabay Naadiga Shimbiraha Skyline (Skyline Bird Club) sanadkii 2022 oo ay qeyb ka Addeeggyada Hawlaha Hal Abuurka dugsiga(C.A.S). Waqtigaas wuxuu ahaa nin caan ka hawlaha shimbiraha aaladda TikTok, halkaasi oo fiidiyaashiisa Shimbirta Todobaadka (“Bird of the Week” videos) uu soo jeeitay dhegeystayaal aad u fara badan markii uu bilaabmay xanuunkii COVID. Macallin Tom hadda wuxuu leeyahay 240K taageerayaal la socda fiidiyaashiisa, halkaas oo subax kasta oo Axadda uu u soo bandhigi jiray TikTokers shimbir cusub oo ka mid ah shimbiraha iyo heesteeda/ sida ay u wacdo, deegaanka, kala duwanaanshaha, cuntada ay cuntom iyo dhaqankeeda.

Wuxuu u maleynayaa in fiidiyowgu yahay mid soo jeedishadiisa la saadaalin karo- dhammaantood waxay raacaan qaab aasaasi ah oo isku mid ah- waxaan laga yaabaa inay fure u noqdaan caanimadooda. “ Waxaan ka helaa faallooyin badan iyo fariimo dadku ku sheegayaan inay qeyn tahay hawladooda todobaadlaha ah.”

Iyada oo dhawaan xitaa kuwa jecel dabeecadda iyo dadka shimbiraha si xiiso leh ugu kuurgala waxay heli doonaan fursad ay ku bartaan Macllin Tom iyo faa’iidadiisa aqoontiisa ballaaran ee uu u leeyahay boqortooyadda baalasha leh. Bisha Juun 2025, jariiradadda Timber Press waxay daabici doontaan buugii ugu horeeyey ee ku saabsan shimbiraha oo uu qoray Myers.

“Waa buug hage ah kala saaraya shimbiraha, ubaxyada iyo macdanaha Waqooyi Galbeed ee Pacific, ee loo qorey caruurta,” ayuu yidhi Myers, “laakiin waxaan u maleynayaa inay soo jiidan doonto dadka da’ kasta oo yihiin, iyada oo aan rajeynayo inay u noqon doonto kheyraad fiican qof gobolkeena ka mid ah kaasi oo bilaabaya inuu wax ka ogaado shimbiraha oo raba inaad tijaabiso sidii uu dhug ugu yeelan lahaa shimbiraha.”

Macallin Myers, dhug u yeelashada shimbiruhu waxay noqotay wax uu si firfircoon u sameeyo. Sida dad badan oo u dhug yeesha shimbiraha, wuxuu ku bilaabay “ liistada nolosha” – dhammaan liistada noocyada aan waligood la aqoonsan- iyo inuu isku dayo inuu ku daro waqti kasta.

“Hadda waxaan shimbiro ku daawadaa maalin kasta ka dib marka aan ka tago dugsiga, iyo inta badan maalmaha Sabtida iyo Axada,”ayuu yidhi. “Marka aan gaadhiga wado, adiga oo ka fiirinaya daaqad kasta, socod kasta marka aad baxdo, marka aad ka shaqeyneyso dayrka gurigaaga. “ Waxaan ahay mar kasta qof fiirsanaya shimbiraha.”